**WASAARADDA QORSHEYNTA, MAALGASHIGA IYO HORUMARINTA DHAQAALAHA**

WASAARADDA QORSHEYNTA QARANKA

# WARSIDAHA BISHA JUUN 2026




Hoggaamінta Qorsheynta Qaranka, Xoojinta Iskaashiga Horumarineed iyo Dardargelinta Hirgelinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029)

## HORDHAC

Warsidaha bishan wuxuu soo bandhigayaa waxqabadkii ugu muhiimsanaa ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha Dowladda Federaalka Soomaaliya intii lagu jiray bisha Juun 2026.

Bishan waxaa si gaar ah mudnaanta loo siiyay saddex tiir oo muhiim u ah hirgelinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025--2029): xoojinta iskaashiga horumarineed, kobcinta maalgashiga, iyo dhismaha nidaamyo qaran oo awood u leh qorsheyn, kormeer, iyo qiimeyn ku saleysan xog iyo caddeyn.

Warsiduhu wuxuu muujinayaa sida Wasaaraddu u sii waddo hoggaaminta isku-duwidda siyaasadaha horumarinta, abaabulka taageerada caalamiga ah, iyo xaqiiqada in dhammaan dadaallada horumarinta ay si dhow ula jaanqaadaan mudnaanta qaranka.

Waxaa sidoo kale lagu soo bandhigayaa kulammo heer sare ah, shirar istiraatiiji ah, tababbarro farsamo, iyo dadaallo lagu xoojinayo wada-shaqeynta Dowladda Federaalka Soomaaliya, dowlad-goboleedyada, hay'adaha caalamiga ah iyo saaxiibbada horumarinta, kuwaas oo dhammaantood ujeeddadoodu tahay in la dardargeliyo hirgelinta himilooyinka horumarineed ee Soomaaliya.

## QODOBADA WARSIDAHA JUUN 2026

Bisha Juun waxay ahayd bil ay Wasaaraddu xoogga saartay isku xirka siyaasadaha horumarinta, xoojinta iskaashiga caalamiga ah, iyo dardargelinta hirgelinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka.

**Qodobadii ugu Muhiimsanaa**

- Safar rasmi ah oo Rome lagu xoojinayay iskaashiga caalamiga ah
- Shirarka Golaha Maamula Sanduuqa Wadajirka Soomaaliya (Somalia Joint Fund)
- Dib-u-eegista mashaariicda la-qabsiga isbeddelka cimilada
- Daahfurka iyo dhammeystirka wadatashiyada Qaab-dhismeedka Qaranka ee Kormeerka iyo Qiimeynta
- Xoojinta iskaashiga UNDP, UNFPA, FAO iyo WFP
- Hirgelinta tababarrada saraakiisha Kormeerka iyo Qiimeynta
- Ka-qaybgalka shirarka caalamiga ah ee Ghana, Kenya iyo Talyaaniga
- Dardargelinta dadaallada soo jiidashada maalgashiga gudaha iyo dibadda
- Horumarinta iskaashiga dowladda iyo bah-wadaagta horumarinta

## WAXA KU JIRA WARSIDAHAN

1. Guddiga Maamula Sanduuqa Wadajirka Soomaaliya oo Dib u Eegay Horumarka iyo Mudnaanta 2026--2027

2. Wasaaradda Qorsheynta oo Qabatay Shir Dib-u-eegis ah oo Lagu Xoojinayo Mashaariicda La-qabsiga Isbeddelka Cimilada

3. Soomaaliya oo Xoojisay Iskaashiga Horumarineed iyo Abaabulka Taageerada Qorshaha Isbeddelka Qaranka

4. Kulan-Howleedka Maalgashiga Qurba-joogta ee ka dhacay magaalada Mombasa, Kenya

5. Soomaaliya oo Shirweynaha Afrika ee Caddeymaha iyo Go'aan-qaadashada ku Saleysan Xogta uga Qayb-gashay Ghana

6. Agaasimaha Guud oo Guddoomiyay Kulan Lagu Xoojinayo Iskaashiga Barnaamijka AARAN ee La-qabsiga Isbeddelka Cimilada iyo Adkeysiga Bulshada

7. Wasaaradda Qorsheynta oo Dib u Eegtay Horumarka Mashaariicda Trocaire si Loo Xoojiyo Isla-xisaabtanka iyo Natiijooyinka Horumarineed

8. Wasaaradda Qorsheynta oo Bah-wadaagta Horumarinta Kala Tashatay Qabyo-qoraalka Ugu Dambeeya ee Qaab-dhismeedka Qaran ee Kormeerka iyo Qiimeynta

9. Wasaaradda Qorsheynta iyo UNDP oo Daahfuray Barnaamijka Iskaashiga Horumarineed ee Soomaaliya 2026--2030

10. Agaasimaha Guud oo Furay Tababar Lagu Xoojinayo Hirgelinta Qaab-dhismeedka Kormeerka iyo Qiimeynta ee NTP 2025--2029

11. Agaasimaha Guud oo Guddoomiyay Shir Lagu Dardargelinayo Waxqabadka iyo Fulinta Mudnaanta Wasaaradda

12. Hirshabelle oo Daahfurtay Qorshaheeda Horumarinta 2026--2030, Isagoo La Janqaadaya Qorshaha Isbeddelka Qaranka

13. Wasaaradda Qorsheynta iyo UNFPA oo Xoojiyay Iskaashiga Qorsheynta ku Dhisan Xogta iyo Horumarinta Karaanka Aadanaha

14. Wasaaradda oo Toddobaadka Ganacsiga Soomaaliya--Talyaaniga ku soo bandhigtay fursadaha maalgashi ee Soomaaliya

15. Wasaaradda Qorsheynta iyo FAO oo Xoojiyay Iskaashiga Istiraatiijiga ah ee Taageeraya Mudnaanta Horumarineed ee Soomaaliya

16. Wasaaradda Qorsheynta oo Ka Qayb-gashay Daahfurka Barnaamijka Qaran ee Hanuuninta Shaqaalaha Dowladda

17. Wasaaradda Qorsheynta oo Ka Qayb-gashay Dib-u-eegista Qorshe-howleedka Sannadka Afraad ee Sanduuqa Taageerada Xasilinta Soomaaliya (SSF)

18. Wasaaradda Qorsheynta iyo Dekedda Muqdisho oo Xoojinaya Iskaashiga Maalgashiga iyo Fududeynta Ganacsiga.

19. Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha iyo Wasaaradda Qorshaynta oo dardargelinaya hirgelinta Nidaamka Qaran ee Kormeerka iyo Qiimaynta
20. Wasaaradda Qorsheynta Qaranka oo Daahfurtay Wadatashiga Qaab-dhismeedka Kormeerka iyo Qiimaynta ee Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025--2029)
21. Wasaaradda Qorsheynta iyo SOMES oo Xoojinaya Iskaashiga Horumarinta Nidaamka Qaranka ee Kormeerka iyo Qiimeynta
22. Shirka Todobaadlaha ee Wasaaradda oo Diiradda Lagu Saaray Waxqabadka iyo Mudnaanta Istiraatiijiga ah
23. Wasaaradda Qorsheynta oo Xoojisay Isku-duwidda Kormeerka iyo Qiimeynta ee Hirgelinta NTP 2025--2029
24. Wasiirka Qorsheynta oo Kooxda Deeq-bixiyeyaasha Soomaaliya Kala Hadlay Dib-u-eegista Hirgelinta NTP iyo Xoojinta Iskaashiga Horumarineed
25. Shirka Dib-u-Eegista Horumarka iyo Dardargelinta Fulinta Mashruuca Barwaaqo oo Nairobi lagu qabtay
26. Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta oo Ka Qayb Galay Shir ku Saabsan Barnaamijka Deyn-Cafinta iyo Horumarka Dhaqaalaha Soomaaliya
27. Wasaaradda Qorsheynta oo Qabatay kulan lagu Dardargelinayo Dadaallada Lagu Xoojinayo Nidaamka Kormeerka iyo Qiimeynta ee Arrimaha Caafimaadka

## Guddiga Maamula Sanduuqa Wadajirka Soomaaliya oo Dib u Eegay Horumarka iyo Mudnaanta 2026--2027




**MUQDISHO, SOOMAALIYA | 30-ka Juun 2026:** Wasiirka Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Dowladda Federaalka Soomaaliya, Mudane Maxamuud C. Sheekh Faarax (Beenebeene), iyo Ku-xigeenka Wakiilka Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay u qaabilsan Soomaaliya, ahna Iskuduwaha Arrimaha Horumarinta iyo Bani'aadannimada, Mudane George Conway, ayaa si wadajir ah u guddoomiyay shirka Guddiga Maamula Sanduuqa Wadajirka Soomaaliya (Somalia Joint Fund -- SJF).

Shirka ayaa dib loogu eegay natiijooyinka qiimeynta bartamaha muddada, waxqabadka iyo xaaladda maalgelinta Sanduuqa, iyadoo sidoo kale lagu gorfeeyay mudnaanta sannadaha 2026--2027, Barnaamijka Saameynta, iyo dib-u-habaynta hababka maalgelinta wadajirka ah.

Kulanka ayaa adkeeyay muhiimadda ay leedahay in taageerada bah-wadaagta horumarintu ay si buuxda ula jaanqaaddo mudnaanta Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo hirgelinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025--2029).

Shirka waxaa sidoo kale ka qayb galay Wasiiru Dowlaha Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha, Mudane Xirsi Gaani; Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, Mudane Cabdifataax Cabdulqaadir Faarax; masuuliyiin ka socday Wasaaradda Maaliyadda, wakiillo ka socday dalalka deeq-bixiyeyaasha, iyo Qaramada Midoobay.

## Wasaaradda Qorsheynta oo Qabatay Shir Dib-u-eegis ah oo Lagu Xoojinayo Mashaariicda La-qabsiga Isbeddelka Cimilada




**MUQDISHO, SOOMAALIYA | 29-ka Juun 2026:** Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha XFS, Mudane Cabdifataax Cabdulqaadir Faarax, ayaa gudoomiyay shir dib-u-eegis ah oo lagu qiimeynayay horumarka mashaariicda lagu xoojinayo la-qabsiga iyo u-adkaysiga isbeddelka cimilada, kuwaas oo uu taageero Sanduuqa Wadajirka Soomaaliya (Somalia Joint Fund).

Shirka ayaa waxaa ka soo qayb galay hay'adaha dowladda, bah-wadaagta horumarinta iyo hay'adaha fuliya mashaariicda si loo qiimeeyo horumarka la gaaray, loona dejiyo tallaabooyin lagu dardargelinayo dadaallada lagu xoojinayo adkeysiga bulshada Soomaaliyeed ee ay saameeyaan abaaraha, fatahaadaha iyo isbeddelka cimiladu, iyadoo la waafajinayo mudnaanta Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025--2029).

Agaasimaha Guud ayaa sheegay in iskaashi dhow, isla-xisaabtan iyo maalgashi waara ay laf-dhabar u yihiin hirgelinta mashaariic wax-ku-ool ah oo taageera horumarka dalka, isla markaana sare u qaada awoodda bulshada Soomaaliyeed ee la-qabsiga isbeddelka cimilada.

Intii uu shirku socday, ka qaybgalayaashu waxay isla falanqeeyeen casharrada laga bartay, caqabadaha jira iyo fursadaha lagu xoojinayo hirgelinta mashaariicda, si loo kordhiyo saameyntooda loona xaqiijiyo natiijooyin waara oo taageera horumarka dalka iyo adkeysiga bulshada.

## Soomaaliya oo Xoojisay Iskaashiga Horumarineed iyo Abaabulka Taageerada Qorshaha Isbeddelka Qaranka



**ROME, TALYAANIGA | 23 - 27-ka Juun 2026:** Bishii Juun, Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ayaa qaaday dadaal diblomaasiyadeed oo heer sare ah oo lagu xoojinayay iskaashiga caalamiga ah iyo abaabulka taageerada lagu hirgelinayo Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025--2029).

Wasiirka Wasaaradda, Mudane Maxamuud C. Sheekh Faarax (Beenebeene), ayaa magaalada Rome kulamo muhiim ah kula yeeshay madaxda hay'adaha Qaramada Midoobay, dalalka deeq-bixiyeyaasha iyo saaxiibbada horumarinta, isagoo adkeeyay mudnaanta Dowladda Federaalka Soomaaliya ee ku aaddan horumar waara, adkeysiga bulshada iyo maalgelinta kobaca dhaqaalaha.

Safarku wuxuu qayb ka ahaa istaraatiijiyadda Dowladda ee lagu xoojinayo lahaanshaha qaranka, abaabulka maalgelinta horumarineed iyo hubinta in taageerada caalamiga ahi ay si buuxda ula jaanqaaddo mudnaanta qaranka.



### Xoojinta Iskaashiga Soomaaliya iyo WFP

Wasiirku wuxuu kulan la yeeshay Ku-simaha Agaasimaha Fulinta ee Hay'adda Cunnada Adduunka (WFP), Carl Skau, halkaas oo diiradda lagu saaray xaaladda bani'aadannimo ee Soomaaliya, sugnaanta cuntada iyo sidii gurmadka degdegga ah loogu xiri lahaa barnaamijyo horumarineed oo waara.

Dowladdu waxay adkaysay in maalgelinta mustaqbalka xoogga la saaro wax-soo-saarka beeraha, la-qabsiga isbeddelka cimilada iyo kobcinta adkeysiga bulshada, si si tartiib tartiib ah loo yareeyo ku-tiirsanaanta gargaarka degdegga ah.

Labada dhinac waxay sidoo kale isla qaateen muhiimadda ay leedahay sii wadidda iskaashiga inta lagu jiro marxaladda kala-guurka ee howlgalka Qaramada Midoobay ee Soomaaliya.

## Soomaaliya iyo FAO oo Ballaariyay Iskaashiga Sugnaanta Cuntada




Kulankii Wasiirka iyo Agaasimaha Guud ee Hay'adda Cuntada iyo Beeraha ee Qaramada Midoobay (FAO), Qu Dongyu, ayaa diiradda lagu saaray horumarinta wax-soo-saarka beeraha, maamulka biyaha, la-tacaalidda saameynta isbeddelka cimilada iyo xoojinta sugnaanta cuntada.

Dowladda Federaalka Soomaaliya waxay caddeysay in sugnaanta cunnadu ay tahay mudnaan qaran oo saldhig u ah hirgelinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka, iyadoo sidoo kale soo jeedisay in si tartiib tartiib ah dowladda loogu wareejiyo maamulka FSNAU, si loo xoojiyo awoodda hay'adaha qaranka.

Dhankeeda, FAO waxay dib u xaqiijisay sida ay uga go'an tahay sii wadidda taageerada ay siiso Soomaaliya.

## Wadahadallo Istaraatiiji ah oo lala yeeshay Dalalka Saaxiibka ah

Intii uu joogay Rome, Wasiirku wuxuu kulammo laba geesood ah la yeeshay wakiillada Dowladda Mareykanka, Boqortooyada Ingiriiska, Türkiye iyo Dowladda Shiinaha.



Kulamadan ayaa lagu xoojiyay iskaashiga dhinacyada horumarinta, ganacsiga, maalgashiga, sugnaanta cunnada iyo dhismaha adkeysiga bulshada.

Dowladdu waxay soo bandhigtay horumarka laga gaaray dib-u-habeynta siyaasadaha dhaqaalaha iyo qorsheynta, iyadoo ku baaqday in taageerada caalamiga ahi ay sii xoojiso mudnaanta ku cad Qorshaha Isbeddelka Qaranka.

Bah-wadaagta ayaa dhankooda bogaadiyay dadaallada Dowladda Federaalka Soomaaliya, iyagoo muujiyay sida ay uga go'an tahay sii wadidda iskaashiga iyo taageerada horumarinta.








## Kulan lala yeeshay Dalalka Deeq-bixiyeyaasha

Wasiirku wuxuu sidoo kale kulan la yeeshay diblomaasiyiinta iyo wakiillada dalalka deeq-bixiyeyaasha ee fadhigoodu yahay magaalada Rome. Kulanka waxaa lagu falanqeeyay isbeddellada ku yimid maalgelinta caalamiga ah, xaaladda bani'aadannimo ee Soomaaliya iyo muhiimadda ay leedahay in taageerada horumarinta lagu saleeyo mudnaanta iyo qorshayaasha Dowladda Federaalka Soomaaliya.

Dowladdu waxay adkaysay in isku dheellitirnaanta gurmadka degdegga ah iyo maalgelinta horumarinta muddada dheer ay muhiim u tahay xaqiijinta horumar waara iyo adkeysiga bulshada Soomaaliyeed.



## Soomaaliya oo Ka Qayb-gashay Golaha Fulinta ee WFP




Safarka Rome waxaa qayb ka ahaa ka-qaybgalka Soomaaliya ee Kalfadhiga Sanadlaha ah ee Golaha Fulinta ee WFP.

Madashan ayaa Dowladda Federaalka Soomaaliya uga faa'iidaysatay soo bandhigista mudnaanta horumarineed ee dalka iyo muhiimadda ay leedahay in qorshayaasha hay'adaha caalamiga ahi ay si dhow ula jaanqaadaan Qorshaha Isbeddelka Qaranka.

Kulanka ayaa sidoo kale lagu falanqeeyay Qorshaha Istaraatiijiyadeed ee WFP ee Soomaaliya (2026--2030), kaas oo taageeraya dadaallada dowladda ee sugnaanta cuntada, adkeysiga bulshada iyo horumarinta nolol-maalmeedka shacabka Soomaaliyeed.

## Natiijada Safarka

Safarka Rome wuxuu xoojiyay doorka Wasaaradda ee hoggaaminta iskaashiga horumarineed iyo abaabulka taageerada caalamiga ah.

Waxa uu sidoo kale adkeeyay kalsoonida bah-wadaagta horumarinta ee qorshayaasha Dowladda Federaalka Soomaaliya, isagoo horseeday is-afgaradyo lagu sii xoojinayo wada-shaqeynta dhinacyada sugnaanta cunnada, horumarinta beeraha, maalgelinta, la-qabsiga isbeddelka cimilada iyo hirgelinta mudnaanta ku cad Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025--2029).

## Kulan-Howleedka Maalgashiga Qurba-joogta ee ka socda magaalada Mombasa, Kenya




**ACCRA, GHANA | 25-ka Juun 2026:** Agaasimaha Waaxda Maalgashiga (SOMINVEST) ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, Mudane Maxamed Dubo Maxamed, ayaa ka qaybgalay Kulan-Howleedka Maalgashiga Qurba-joogta ee ka socda magaalada Mombasa, Kenya. Kulankan oo ay si wadajir ah u soo qaban-qaabiyeen COMESA iyo IOM ayaa diiradda lagu saarayaa xoojinta maalgashiga ay hormuudka ka yihiin qurba-joogtu iyo kobcinta iskaashiga dhaqaalaha ee gobolka.

Madashan ayaa Soomaaliya u ah fursad muhiim ah oo lagu soo bandhigo fursadaha maalgashi ee dalka, lagu xoojiyo xiriirka lala leeyahay maalgashatada qurba-joogta, laguna dhiirrigeliyo maalgelinta qaybaha mudnaanta u leh kobaca dhaqaalaha, shaqo-abuurka, iyo horumarka waara.

Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha waxaa ka go'an xoojinta doorka qurba-joogta Soomaaliyeed ee horumarinta dhaqaalaha dalka, iyadoo ka shaqaynaysa in aqoonta, khibradda, shabakadaha ganacsi iyo raasumaalka qurba-joogta loo beddelo maalgashi wax-ku-ool ah oo taageera hirgelinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025--2029) iyo kobac dhaqaale oo waara.

## Soomaaliya oo Shirweynaha Afrika ee Caddeymaha iyo Go'aan-qaadashada ku Saleysan Xogta uga Qayb-gashay Ghana




**ACCRA, CHANA | 25-ka Juun 2026:** Agaasimaha Waaxda Kormeerka iyo Qiimaynta ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha XFS, Mudane Maxamuud Siciid Nuur, oo uu weheliyo Lataliyaha Sare ee Waaxda, Mudane Maxamuud Maxamed Maxamuud, ayaa ka qayb galay Shirweynaha 9-aad ee "Evidence to Action" (Caddeymo loo Rogayo Ficil) oo ka socda magaalada Accra ee dalka Ghana.

Shirkan ayaa waxaa ka qeybgalaya masuuliyiin, khubaro, cilmi-baarayaal iyo bahwadaagta horumarinta ee Afrika si ay uga wada hadlaan xoojinta siyaasad-dejinta iyo go'aan-qaadashada ku saleysan xog, cilmi-baaris iyo caddeymo.

Intii uu shirku socday, Agaasime Maxamuud Siciid Nuur ayaa soo bandhigay horumarka ay Soomaaliya ka gaartay dhismaha nidaamyada Kormeerka iyo Qiimaynta ee ku saleysan caddeymaha.

Waxa uu sidoo kale la wadaagay waaya-aragnimada dalka, oo ay ku jirto qabashadii Shirweynihii Qaran ee ugu horreeyay ee Kormeerka iyo Qiimaynta Soomaaliya.

Ka qaybgalka shirkan ayaa xoojinaya doorka Wasaaradda ee is-weydaarsiga aqoonta iyo horumarinta go'aan-qaadasho ku dhisan caddeymo, si loo taageero hirgelinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025--2029) iyo horumar waara.

## Agaasimaha Guud oo Guddoomiyay Kulan Lagu Xoojinayo Iskaashiga Barnaamijka AARAN ee La-qabsiga Isbeddelka Cimilada iyo Adkeysiga Bulshada



**MUQDISHO, SOOMAALIYA | 24-ka Juun 2026:** Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha XFS, Mudane Cabdifataax Cabdulqaadir Faarax, iyo Agaasimaha Horumarinta ee Safaaradda Ingiriiska ee Soomaaliya, Mudane Christopher Pycroft, ayaa si wadajir ah u guddoomiyay kulan wadatashi ah oo ku saabsan Barnaamijka Xoojinta La-qabsiga Isbeddelka Cimilada, Adkeysiga Bulshada iyo Ilaalinta Khayraadka Dabiiciga ah (AARAN).

Kulanka ayaa Waxaa kasoo qeybgalay hay'adaha Dowladda Federaalka Soomaaliya, Safaaradda Ingiriiska iyo bah-wadaagta horumarinta si ay uga wada hadlaan sidii loo xoojin lahaa dadaallada lagu la qabsanayo saameynta isbeddelka cimilada, laguna horumarin lahaa maareynta khayraadka dabiiciga ah, loona taageeri lahaa bulshooyinka ay saameeyaan abaarta, barakaca iyo dhibaatooyinka deegaanka. Barnaamijka AARAN ayaa diiradda saaraya dhismaha bulshooyin adkaysi leh iyo horumarinta xalal waara oo yareynaya nuglaanta ka dhalata isbeddelka cimilada.

Agaasimaha Guud ayaa adkeeyay muhiimadda iskaashiga u dhexeeya dowladda iyo saaxiibada horumarinta si loo gaaro natiijooyin waara oo kor u qaada adkeysiga bulshada, ilaalinta deegaanka iyo fursadaha nololeed ee shacabka Soomaaliyeed. Kulanka ayaa sidoo kale xoojiyay iswaafajinta dadaallada lagu taageerayo hirgelinta mudnaanta ku xusan Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025--2029).

## Wasaaradda Qorsheynta oo Dib u Eegtay Horumarka Mashaariicda Trocaire si Loo Xoojiyo Isla-xisaabtanka iyo Natiijooyinka Horumarineed



**MUQDISHO, SOOMAALIYA | 23-ka Juun 2026:** Waaxda Kormeerka iyo Qiimaynta ee Wasaaradda Qorshaynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha XFS ayaa kulan isla-xisaabtan iyo warbixin-dhageysi ah la yeelatay Hay'adda Trocaire, si loo qiimeeyo horumarka mashaariicda ay ka fuliso Soomaaliya iyo heerka ay ula jaanqaadayaan mudnaanta horumarineed ee dalka.

Kulanka ayaa diiradda lagu saaray natiijooyinka la gaaray, caqabadaha jira iyo sidii loo xoojin lahaa hufnaanta, isla-xisaabtanka iyo waxtarka mashaariicda, si ay uga qayb qaataan hirgelinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka.

Sidoo kale, Agaasimaha Waaxda Kormeerka iyo Qiimaynta, Mudane Maxamuud Siciid Nuur, ayaa la wadaagay horumarka laga sameeyay dib-u-habaynta hannaanka qaran ee Kormeerka iyo Qiimaynta iyo dadaallada lagu xoojinayo go'aan-qaadashada ku salaysan xog iyo caddeymo.

Kulanka ayaa ku soo dhammaaday is-afgarad lagu xoojinayo wada-shaqeynta Dowladda iyo bahwadaagta horumarinta, si loo hubiyo in mashaariicdu ay soo saaraan natiijooyin la cabbiri karo oo si toos ah u taageera himilooyinka horumarineed ee Soomaaliya.

## Wasaaradda Qorsheynta oo Bah-wadaagta Horumarinta Kala Tashatay Qabyo-qoraalka Ugu Dambeeya ee Qaab-dhismeedka Qaran ee Kormeerka iyo Qiimeynta




**MUQDISHO, SOOMAALIYA | 21-ka Juun 2026:** Wasaaradda Qorshaynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya ayaa la yeelatay bah-wadaagta horumarinta kulan wadatashi ah oo ku saabsan qabyo-qoraalka ugu dambeeya ee Qaab-dhismeedka Qaran ee Kormeerka iyo Qiimeynta (M&E Framework) ee Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025--2029).

Kulanka, oo uu furay Agaasimaha Guud ee Wasaaradda, Mudane Cabdifataax Cabdulqaadir Faarax, ayaa waxaa ka qaybgalay wakiillo ka socday hay'adaha Qaramada Midoobay, hay'adaha caalamiga ah iyo saaxiibbada horumarinta. Wadatashigu wuxuu diiradda saaray dib-u-eegista qaab-dhismeedka iyo xoojinta nidaamka qaran ee kormeerka iyo qiimaynta si loo taageero isla xisaabtanka, cabbiridda natiijooyinka iyo go'aan-qaadashada ku salaysan xog lagu kalsoonaan karo.

Ka qaybgalayaashu waxay soo jeediyeen talooyin wax-ku-ool ah, iyagoo muujiyey taageeradooda dhammaystirka qaab-dhismeedkan, kaas oo muhiim u ah hirgelinta, Kormeerka iyo qiimeynta Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025--2029).

## Wasaaradda Qorsheynta iyo UNDP oo Daahfuray Barnaamijka Iskaashiga Horumarineed ee Soomaaliya 2026--2030




**MUQDISHO, SOOMAALIYA | 21 Juun 2026:** Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha Dowladda Federaalka Soomaaliya, Mudane Cabdifataax Cabdulqaadir Faarax, ayaa khudbadaha furitaanka iyo xiritaanka ka jeediyay munaasabadda daahfurka Barnaamijka Istiraatiijiyadeed ee Hay'adda Qaramada Midoobay u qaabilsan Horumarinta (UNDP) ee Soomaaliya (Country Programme Document -- CPD 2026--2030).

Barnaamijkan ayaa hagaya iskaashiga horumarineed ee u dhexeeya Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo UNDP shanta sano ee soo socota, iyadoo mudnaanta la siinayo xoojinta dowladnimada, kobcinta dhaqaalaha, horumarinta adeegyada bulshada iyo dhisidda bulsho adkaysi leh.

Khudbaddiisa, Agaasimaha Guud ayaa adkeeyay muhiimadda ay leedahay in taageerada horumarineed si buuxda loo waafajiyo mudnaanta qaranka ee ku cad Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025--2029), si loo xaqiijiyo natiijooyin waara oo si toos ah uga jawaaba baahiyaha iyo himilooyinka shacabka Soomaaliyeed.

## Agaasimaha Guud oo Furay Tababar Lagu Xoojinayo Hirgelinta Qaab-dhismeedka Kormeerka iyo Qiimeynta ee NTP 2025--2029



**MUQDISHO, SOOMAALIYA | 20-ka Juun 2026:** Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, Mudane Cabdifataax Cabdulqaadir Faarax, ayaa furay tababar loo qabtay Saraakiisha Kormeerka iyo Qiimeynta ee Wasaaradaha Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha, si loo xoojiyo hirgelinta Qaab-dhismeedka Kormeerka iyo Qiimeynta ee Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025--2029).

Tababarka ayaa lagu xoojiyay awoodda saraakiisha ee cabbiridda waxqabadka, la socodka horumarka iyo qiimeynta natiijooyinka, si loo taageero go'aan qaadashada ku salaysan xog iyo kor u qaadista isla xisaabtanka hay'adaha dowladda.

Tababarkan ayaa door muhiim ah ka qaadanaya xoojinta awoodda dowladda ee la socodka iyo cabbiridda horumarka dalka, si loo hubiyo in mudnaanta Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025--2029) ay horseedaan natiijooyin la taaban karo oo ay bulshada Soomaaliyeed ka faa'iideysato.

Munaasabadda waxaa ka qeyb galay mas'uuliyiin ka socday Dowladda Federaalka Soomaaliya, hay'adaha Qaramada Midoobay, bahwadaagta horumarinta, bulshada rayidka ah, aqoonyahanno iyo wakiillo ka socday ganacsiga gaarka loo leeyahay, iyadoo diiradda lagu saaray xoojinta iskaashiga iyo dardargelinta hirgelinta mudnaanta horumarineed ee dalka.

Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha waxay sii wadi doontaa hoggaaminta iyo isku-dubbaridka iskaashiga horumarineed si loo xaqiijiyo in taageerada bahwadaagta horumarintu ay si buuxda ula jaanqaaddo qorshayaasha iyo mudnaanta horumarineed ee Soomaaliya.

## Agaasimaha Guud oo Guddoomiyay Shir Lagu Dardargelinayo Waxqabadka iyo Fulinta Mudnaanta Wasaaradda



**MUQDISHO, SOOMAALIYA | 20-ka Juun 2026:** Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha XFS, Mudane Cabdifataax Cabdulqaadir Faarax, ayaa guddoomiyay Shirka Todobaadlaha oo ay ka qeybgaleen Agaasimeyaasha Waaxyaha Wasaaradda, kaas oo diiradda lagu saaray dardargelinta howlaha mudnaanta leh ee horyaalla Wasaaradda iyo xoojinta hannaanka fulinta qorshayaasha istiraatiijiga ah.

Shirka ayaa lagu falanqeeyay horumarka laga sameeyay Ballanqaadka Waxqabadka (Commitment Sheet) ee Wasaaraddu la gashay Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha, iyadoo xoogga la saaray kor u qaadidda waxqabadka hay'adeed, isla xisaabtanka iyo dedejinta natiijooyinka la taaban karo.

Sidoo kale, kulanka ayaa lagu gorfeeyay dhaqangelinta qaab-dhismeedka cusub ee Wasaaradda, si loo xoojiyo hufnaanta maamulka, isku-duwidda shaqada iyo tayeynta waajibaadka shaqo ay Wasaaraddu u hayso dowladda iyo shacabka Soomaaliyeed.

Agaasimaha Guud ayaa ku boorriyey madaxda waaxyaha inay sii laba jibbaaraan dadaallada lagu xaqiijinayo himilooyinka Wasaaradda, islamarkaana la dardargeliyo fulinta mudnaanta qaranka ee ku xusan Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025--2029).

## Hirshabelle oo Daahfurtay Qorshaheeda Horumarinta 2026--2030, Isagoo La Janqaadaya Qorshaha Isbeddelka Qaranka



**MUQDISHO, SOOMAALIYA | 16-ka Juun 2026:** Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha Dowladda Federaalka Soomaaliya, Mudane Cabdifataax Cabdiqaadir Faarax, ayaa ka qeyb-galay munaasabadda daahfurka Qorshaha Horumarinta Dowlad-goboleedka Hirshabelle (2026--2030).
Qorshahan ayaa waxaa si rasmi ah u daahfuray Madaxweynaha Dowlad-goboleedka Hirshabelle, Mudane Cali Cabdullaahi Xuseen (Cali Guudlaawe), iyadoo ay kasoo qeybgaleen masuuliyiin heer federaal iyo heer dowlad-goboleed ah, bahwadaagta horumarinta, iyo qeybaha kala duwan ee bulshada.

Qorshaha Horumarinta Hirshabelle (2026--2030) ayaa la jaanqaadaya Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025--2029), taas oo xoojinaysa isku-duwidda qorsheynta, mudnaanta horumarineed iyo maalgelinta heer federaal iyo heer dowlad-goboleed.

Mudane Cabdifataax Cabdiqaadir Faarax ayaa bogaadiyey Dowlad-goboleedka Hirshabelle oo ku guuleysatay diyaarinta qorshaheeda horumarineed, isagoo xusay in qorshahani uu saldhig u noqon doono dadaallada lagu dardargelinayo horumarka dhaqaale iyo bulshada, isla markaana kor loogu qaadayo hufnaanta iyo isla-xisaabtanka hirgelinta qorshayaasha horumarineed.

Agaasimaha Guud ayaa sidoo kale ka qeyb-galay munaasabadda saxiixa rasmiga ah ee Qorshaha Horumarinta Hirshabelle (2026--2030), taas oo calaamad u ah bilowga wejiga hirgelinta qorshaha iyo xoojinta wada-shaqeynta Dowladda Federaalka Soomaaliya, Dowlad-goboleedka Hirshabelle iyo bahwadaagta horumarinta.

## Wasaaradda Qorsheynta iyo UNFPA oo Xoojiyay Iskaashiga Qorsheynta ku Dhisan Xogta iyo Horumarinta Karaanka Aadanaha{width="6.5in"



**MUQDISHO, SOOMAALIYA | 16-ka Juun 2026:** Wasiirka Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha XFS, Mudane Maxamuud C. Sheekh Faarax (Beenebeene), ayaa kulan la yeeshay Wakiilka cusub ee UNFPA Soomaaliya, Mudane Judicael Elidje.

Kulanka ayaa diiradda lagu saaray xoojinta iskaashiga Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo UNFPA ee taageeraya hirgelinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025--2029), gaar ahaan arrimaha dadka iyo horumarka, xogta tirakoobka iyo demografiyada, awood-siinta dhalinyarada, horumarinta haweenka, iyo kobcinta karaanka aadanaha.

Sidoo kale, labada dhinac ayaa ka wada hadlay muhiimadda ay leedahay in arrimaha dadka iyo horumarka lagu daro qorsheynta qaranka, xoojinta nidaamyada xogta iyo tirakoobka, iyo dadaallada lagu dhisayo Waaxda Dadweynaha iyo Horumarka si loo taageero qorsheyn iyo go'aan-qaadasho ku dhisan xog iyo caddayn.

Wasaaraddu waxay uga mahadcelisay UNFPA taageerada joogtada ah ee ay siiso Soomaaliya, iyadoo labada dhinac hoosta ka xariiqay muhiimadda ay leedahay sii xoojinta iskaashiga lagu taageerayo himilooyinka horumarineed ee dalka.

## Wasaaradda oo Toddobaadka Ganacsiga Soomaaliya--Talyaaniga ku soo bandhigtay fursadaha maalgashi ee Soomaaliya{width="6.5in"



**MUQDISHO, SOOMAALIYA | 13-ka Juun 2026:** Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Dowladda Federaalka Soomaaliya ayaa madasha Toddobaadka Ganacsiga Soomaaliya iyo Talyaaniga ku soo bandhigtay aragtida Dowladda Federaalka Soomaaliya ee ku aaddan soo jiidashada maalgashiga, kobcinta ganacsiga iyo xoojinta iskaashiga dhaqaale ee caalamiga ah.

Munaasabadda, oo uu si rasmi ah u furay Ra'iisul Wasaare Ku-Xigeenka Koowaad ee XFS, Mudane Saalax Axmed Jaamac, ayaa waxaa kasoo qeybgalay mas'uuliyiin dowladda ka tirsan, maalgashadayaal, ganacsato iyo bahwadaag horumarineed oo ka kala socday Soomaaliya iyo Talyaaniga.

Wasiirka Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha XFS, Mudane Maxamuud C. Sheekh Faarax (Beenebeene), oo khudbad ka jeediyay munaasabadda, ayaa adkeeyay muhiimadda ay leedahay in la xoojiyo Iskaashiga dhaqaale iyo maalgashiga gaarka loo leeyahay si loo dardargeliyo kobaca dhaqaalaha dalka, loona abuuro fursado shaqo oo waara.

Wasiirku waxa uu sidoo kale iftiimiyay horumarka ay Soomaaliya ka sameysay dib-u-habeynta dhaqaalaha iyo hagaajinta jawiga maalgashiga, kuwaas oo sare u qaaday kalsoonida maalgashadayaasha caalamiga ah. Munaasabadda waxaa sidoo kale goobjoog ka ahaa Agaasimaha Guud ee Wasaaradda, Mudane Cabdifataax Cabdulqaadir Faarax, iyo mas'uuliyiin kale oo ka tirsan Wasaaradda.

Toddobaadkan Ganacsiga Soomaaliya--Talyaaniga ayaa la filayaa inuu horseedo iskaashi cusub iyo maalgashi wax-ku-ool ah oo taageera hirgelinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025--2029) isla markaana gacan ka geysta koboca dhaqaalaha iyo barwaaqada Soomaaliya.

## Wasaaradda Qorsheynta iyo FAO oo Xoojiyay Iskaashiga Istiraatiijiga ah ee Taageeraya Mudnaanta Horumarineed ee Soomaaliya



**MUQDISHO, SOOMAALIYA | 11-ka Juun 2026:** Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Dowladda Federaalka Soomaaliya, Mudane Cabdifatax Cabdulqaadir Faarax, ayaa xarunta Wasaaradda kulan istiraatiiji ah kula yeeshay wafdi sare oo ka socday Hay'adda Cuntada iyo Beeraha ee Qaramada Midoobay (FAO), oo ay hoggaaminaysay Marwo Verenica Mutiro, Madaxa Barnaamijyada FAO ee Soomaaliya.

Kulanka waxaa sidoo kale ka qeyb galay Agaasimaha Waaxda Kormeerka iyo Qiimaynta, Mudane Maxamuud Siciid Nuur, iyo madaxda qaybaha kala duwan ee Waaxda Kormeerka iyo Qiimaynta.

Wadahadallada ayaa diiradda lagu saaray xoojinta iskaashiga istiraatiijiga ah ee u dhexeeya Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo FAO, iyadoo mudnaanta la siinayo waafajinta taageerada FAO iyo himilooyinka ku cad Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025--2029).

Labada dhinac ayaa isku raacay in la dejiyo meelaha mudnaanta leh ee iskaashiga mustaqbalka, gaar ahaan sugnaanta cuntada, horumarinta wax-soo-saarka, adkeysiga bulshada, iyo xoojinta awoodda hay'adaha dowladda. Sidoo kale, waxaa laga wada hadlay diyaarinta Qorshe Hawleed Wadajir ah oo saddex sano ah, kaas oo hagaya wada-shaqeynta, mudnaanta barnaamijyada, iyo natiijooyinka la filayo in la gaaro.

Kulanka ayaa sidoo kale lagu falanqeeyay xoojinta dadaallada abaabulka kheyraadka, si loo helo maalgelin dheeraad ah oo taageerta mudnaanta horumarineed ee dalka, loona dardargeliyo hirgelinta barnaamijyada saameynta leh.

Agaasimaha Guud ayaa adkeeyay muhiimadda ay leedahay in dhammaan taageerada iyo mashaariicda horumarineed lagu saleeyo mudnaanta qaranka, natiijooyin la cabbiri karo, iyo isla xisaabtan, si loo xaqiijiyo horumar waara oo shacabka Soomaaliyeed ka faa'iideystaan.

Kulanka ayaa kusoo dhammaaday is-afgarad lagu sii xoojinayo wada-shaqeynta istiraatiijiga ah ee Wasaaradda iyo FAO, iyadoo la dardargelinayo qorsheynta wadajirka ah, isku-duwidda barnaamijyada, iyo taageerada horumarinta qaranka.

## Wasaaradda Qorsheynta oo Ka Qayb-gashay Daahfurka Barnaamijka Qaran ee Hanuuninta Shaqaalaha Dowladda




**MUQDISHO, SOOMAALIYA | 10-ka Juun 2026:** Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha XFS ayaa ka qeyb gashay daahfurka Barnaamijka Qaran ee Hanuuninta Shaqaalaha Dowladda, oo ay iska kaashanayaan Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha JFS iyo Guddiga Qaran ee Shaqaalaha Rayidka ah.

Barnaamijkan ayaa lagu xoojinayaa awoodda Agaasimayaasha Waaxyaha, Madaxda Qaybeedyada iyo hoggaanka dhexe ee dowladda si loo hormariyo hoggaamin wax-ku-ool ah, kor loogu qaado tayada adeegyada dowladda, loona adkeeyo dhaqanka hufnaanta, isla xisaabtanka iyo anshaxa shaqada.

Ku-simaha Agaasimaha Guud ahna Agaasimaha Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta ee Wasaaradda, Mudane Maxamuud Siciid Nuur, ayaa adkeeyay in nidaamyo Kormeer iyo Qiimeyn oo xooggan ay muhiim u yihiin cabbiridda waxqabadka hay'adaha dowladda iyo xaqiijinta in qorshayaasha horumarineed ay isu beddelaan natiijooyin la taaban karo oo shacabka Soomaaliyeed ka faa'iideystaan.

Barnaamijkan wuxuu qayb ka yahay dadaallada socda ee Dowladda Federaalka Soomaaliya ee lagu casriyeynayo maamulka dowladda, lagu tayeynayo shaqaalaha rayidka ah, laguna dhisayo hay'ado awood u leh inay si hufan u fuliyaan mudnaanta qaranka.

## Wasaaradda Qorsheynta oo Ka Qayb-gashay Dib-u-eegista Qorshe-howleedka Sannadka Afraad ee Sanduuqa Taageerada Xasilinta Soomaaliya (SSF)



**MUQDISHO, SOOMAALIYA | 9-ka Juun 2026:** Ku-simaha Agaasimaha Guud, ahna Agaasimaha Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha XFS, Mudane Maxamuud Siciid Nuur, ayaa ka qeybgalay kulanka dib-u-eegista qorshe-howleedka ee sannadka afraad ee Sanduuqa Taageerada Xasilinta Soomaaliya (SSF).

Kulanka waxaa ka qeybgalay Dowladda Federaalka Soomaaliya, Dowlad Goboleedyada, Gobolka Banaadir, hay'adaha horumarinta iyo deeq-bixiyeyaasha si loo xaqiijiyo in mudnaanta iyo maalgelinta SSF ay la jaanqaadaan baahiyaha bulshada Soomaaliyeed iyo himilooyinka horumarineed ee qaranka.

Doodaha ayaa diiradda lagu saaray xoojinta iskaashiga iyo isku-duwidda bahwadaagta, kor u qaadista waxtarka maalgelinta, iyo dardargelinta dadaallada xasilinta, dowlad-dhiska, iyo horumarinta adeegyada bulshada si loo gaaro natiijooyin waara oo la taaban karo.

## Wasaaradda Qorsheynta iyo Dekedda Muqdisho oo Xoojinaya Iskaashiga Maalgashiga iyo Fududeynta Ganacsiga



**MUQDISHO, SOOMAALIYA | 9-ka Juun 2026:** Waaxda Maalgashiga ee Wasaaradda Qorshaynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha XFS, oo uu hoggaaminayay Agaasimaha Waaxda, Mudane Maxamed Dubo, ayaa booqasho shaqo ku tagay Dekedda Muqdisho, halkaas oo ay kulan kula yeesheen Maareeyaha Guud ee Dekedda Muqdisho, Danjire Maxamed Cali Nuur "Ameeriko", iyo hoggaanka dekedda.

Kulanka ayaa diiradda lagu saaray xoojinta iskaashiga hay'adaha dowladda, hagaajinta adeegyada loo fidiyo maalgashatada, ganacsatada, iyo kor u qaadista fududeynta ganacsiga si loo taageero koboca dhaqaalaha dalka.

Mas'uuliyiintu waxay sidoo kale dib u eegeen horumarka la taaban karo ee Dekedda Muqdisho, oo ay ka mid yihiin kororka maraakiibta iyo badeecadaha soo gala dalka, casriyeynta qalabka iyo kaabeyaasha dekedda, iyo hirgelinta adeegyada 24-ka saac, kuwaas oo sare u qaaday hufnaanta iyo tayada adeegyada dekedda.

Horumarradan ayaa muujinaya kalsoonida sii kordheysa ee maalgashadayaasha iyo shirkadaha caalamiga ah ay ku qabaan Soomaaliya, waxayna gacan ka geysanayaan dhimista kharashaadka ganacsiga, kobcinta ganacsiga, iyo xoojinta dowrka Soomaaliya ee suuqyada gobolka iyo kuwa caalamiga ah.

Waaxda Maalgashiga ee Wasaaradda Qorshaynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha waxay sii xoojin doontaa iskaashiyada istaraatiijiga ah ee taageeraya Maalgashiga iyo hirgelinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025--2029).

## Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha iyo Wasaaradda Qorshaynta oo dardargelinaya hirgelinta Nidaamka Qaran ee Kormeerka iyo Qiimaynta



**MUQDISHO, SOOMAALIYA | 8-da Juun 2026:** Ku-simaha Agaasimaha Guud ahna Agaasimaha Waaxda Kormeerka iyo Qiimaynta ee Wasaaradda Qorshaynta, Mudane Maxamuud Siciid Nuur, ayaa Ku-simaha Xoghayaha Joogtada ahna Ku-xigeenka Xoghayaha Joogtada ee Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha, Mudane Cabdirisaaq Ibraahim, la wadaagay warbixin ku saabsan horumarka Nidaamka Qaran ee Kormeerka iyo Qiimaynta.

Warbixintu waxay muujisay in la dhammaystiray dhismaha guddiyada Kormeerka iyo Qiimaynta ee 25-ka wasaaradood ee Dowladda Federaalka Soomaaliya, iyo sidoo kale Guddiga Qaran ee Kormeerka iyo Qiimaynta ee Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025--2029).

Waxaa sidoo kale bilowday wajiga labaad ee dhismaha guddiyada Kormeerka iyo Qiimaynta ee hay'adaha madaxbannaan, si loo xoojiyo isla xisaabtanka, tayada warbixinnada, iyo go'aan qaadashada ku salaysan xog lagu kalsoonaan karo.

Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha ayaa xaqiijiyay taageeradiisa hirgelinta hannaan qaran oo mideysan oo lagu xoojinayo la socodka iyo cabbiridda natiijooyinka Qorshaha Isbeddelka Qaranka.

## Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha iyo Wasaaradda Qorshaynta oo dardargelinaya hirgelinta Nidaamka Qaran ee Kormeerka iyo Qiimaynta



**MUQDISHO, SOOMAALIYA | 7-da Juun 2026:** Wasiirka Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Dowladda Federaalka Soomaaliya, Mudane Maxamuud C. Sheekh Faarax (Beenebeene), ayaa si rasmi ah u daahfuray Shirka Wadatashiga Qaab-dhismeedka Kormeerka iyo Qiimaynta ee Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025--2029).

Shirkan ayaa lagu falanqeeyay qabyo-qoraalka Qaab-dhismeedka Kormeerka iyo Qiimaynta ee NTP, iyadoo ujeeddadu ahayd in la helo talooyin farsamo iyo aragtiyo wax-ku-ool ah oo lagu tayeynayo nidaamka kormeerka, cabbirka natiijooyinka, iyo qiimaynta waxqabadka hay'adaha dowladda.

Intii uu furitaanka shirka ku guda jiray, Wasiir Beenebeene ayaa carrabka ku adkeeyay muhiimadda ay leedahay in Soomaaliya yeelato nidaam Kormeer iyo Qiimayn oo mideysan, hufan, isla markaana awood u leh inuu si sax ah u cabbiro horumarka laga gaarayo hirgelinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka.

"Qorshaha Isbeddelka Qaranka wuxuu u baahan yahay nidaam Kormeer iyo Qiimayn oo xooggan si aan si joogto ah ula soconno horumarka la gaarayo, u cabbirno natiijooyinka, una xaqiijinno isla xisaabtan iyo go'aan-qaadasho ku saleysan xog iyo caddeyn" ayuu yiri Wasiirku.

Dhanka kale, Ku-simaha Agaasimaha Guud ahna Agaasimaha Waaxda Kormeerka iyo Qiimaynta ee Wasaaradda, Mudane Maxamuud Siciid Nuur, ayaa ka hadlay muhiimadda ay leedahay in la helo hannaan mideysan oo lagu cabbiro horumarka laguna qiimeeyo waxqabadka hay'adaha dowladda, si loo xoojiyo tayada xogta, isla xisaabtanka, iyo warbixinnada horumarka.

Shirka waxaa sidoo kale barbar socday aqoon-is-weydaarsi ku saabsan kormeerka iyo qiimaynta, oo ay soo bandhigeen khubaro caalami ah, kuwaas oo la wadaagay ka qeybgalayaasha habab iyo khibrado casri ah oo lagu horumarin karo nidaamyada kormeerka, qiimaynta iyo warbixinta.

Kulanka waxaa ka qeyb galay Agaasimayaasha Waaxyaha Qorsheynta, Madax-qaybeedyada Kormeerka iyo Qiimaynta, la-taliyeyaal iyo masuuliyiin kale oo ka socday hay'adaha dowladda, kuwaas oo soo jeediyay talooyin iyo aragtiyo lagu sii xoojinayo qaab-dhismeedka cusub.

Gabagabadii, ka qeybgalayaashu waxay isku raaceen muhiimadda ay leedahay hirgelinta nidaam hufan, mideysan, oo wax-ku-ool ah oo lagu cabbiro natiijooyinka iyo saameynta Qorshaha Isbeddelka Qaranka, si loo xoojiyo isla xisaabtanka, kor loogu qaado waxqabadka dowladda, loona dardargeliyo horumarka waara ee Soomaaliya.

## Wasaaradda Qorsheynta Qaranka oo Daahfurtay Wadatashiga Qaab-dhismeedka Kormeerka iyo Qiimaynta ee Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025--2029)



**MUQDISHO, SOOMAALIYA | 6-da Juun 2026:** Ku-simaha Agaasimaha Guud ahna Agaasimaha Waaxda Kormeerka iyo Qiimaynta, Mudane Maxamuud Siciid Nuur, ayaa kulan la yeeshay Hoggaanka Sare ee Ururka Qiimaynta Soomaaliya (SOMES), halkaas oo looga hadlay horumarinta mihnadda qiimaynta, kobcinta awoodaha xirfadeed, iyo xoojinta dhaqanka qiimaynta ee Soomaaliya.

Kulanka ayaa sidoo kale lagu soo bandhigay horumarka ay SOMES gaartay, oo ay ku jirto xubinnimada rasmiga ah ee ay ka heshay Bulshada Qiimaynta Afrika (AfrEA), tallaabo muhiim ah oo kor u qaadaysa aqoonsiga iyo horumarinta mihnadda qiimaynta ee dalka.

Labada dhinac ayaa isku raacay in la xoojiyo iskaashiga lagu taageerayo hirgelinta Siyaasadda Qaranka ee Kormeerka iyo Qiimaynta, si loo helo hay'ado dowladeed iyo barnaamijyo horumarineed oo ku shaqeeya xog, caddeymo, iyo natiijooyin la cabbiri karo.

## Shirka Todobaadlaha ee Wasaaradda oo Diiradda Lagu Saaray Waxqabadka iyo Mudnaanta Istiraatiijiga ah



**MUQDISHO, SOOMAALIYA | 3-da Juun 2026:** Ku-simaha Agaasimaha Guud ahna Agaasimaha Waaxda Kormeerka iyo Qiimaynta, Mudane Maxamuud Siciid Nuur, ayaa guddoomiyay shirka todobaadlaha ee Agaasime Waaxeedyada Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha.

Kulanka ayaa diiradda lagu saaray dib-u-eegista waxqabadka waaxyaha Wasaaradda, hirgelinta Aaladda La-socodka Waxqabadka ee Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha, iyo horumarka laga gaaray dib-u-eegista muddada dhexe ee Istiraatiijiyadda Guud ee Wasaaradda.

Shirka ayaa lagu adkeeyay xoojinta isla-xisaabtanka, kor u qaadista hufnaanta, iyo dardargelinta fulinta mudnaanta istiraatiijiga ah si loo xaqiijiyo gaarista natiijooyin wax ku ool ah oo taageeraya hirgelinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025--2029).

## Wasaaradda Qorsheynta oo Xoojisay Isku-duwidda Kormeerka iyo Qiimeynta ee Hirgelinta NTP 2025--2029



**MUQDISHO, SOOMAALIYA | 3-da Juun 2026:** Wasaaradda Qorshaynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ayaa qabatay shirka Guddiyada Kormeerka iyo Qiimaynta (K&Q) ee Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025--2029), kaas oo ay ka soo qeybgaleen madaxda K&Q ee 25-ka wasaaradood ee Dowladda Federaalka Soomaaliya.

Kulanka ayaa diiradda lagu saaray xoojinta nidaamka Kormeerka iyo Qiimaynta, dhamaystirka qaab-dhismeedka guddiyada K&Q, dib-u-eegista Qaab-dhismeedka Kormeerka iyo Qiimaynta ee NTP (NTP Monitoring and Evaluation Framework), iyo tayeynta warbixinnada waxqabadka rubuclaha ah.

Ku-simaha Agaasimaha Guud ahna Agaasimaha Waaxda Kormeerka iyo Qiimaynta, Mudane Maxamuud Siciid Nuur, ayaa adkeeyay muhiimadda xog sax ah oo lagu kalsoonaan karo, xoojinta isla xisaabtanka, iyo go'aan qaadasho ku saleysan caddeymo si loo xaqiijiyo hirgelinta wax-ku-oolka ah ee Qorshaha Isbeddelka Qaranka.

## Wasiirka Qorsheynta oo Kooxda Deeq-bixiyeyaasha Soomaaliya Kala Hadlay Dib-u-eegista Hirgelinta NTP iyo Xoojinta Iskaashiga Horumarineed



**MUQDISHO, SOOMAALIYA | 3-da Juun 2026:** Wasiirka Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha XFS, Mudane Maxamuud Cabdi Sheekh Faarax (Beenebeene), ayaa magaalada Nairobi kulan muhiim ah kula yeeshay Kooxda Deeq-bixiyeyaasha Soomaaliya (Somali Donor Group -- SDG), kaas oo diiradda lagu saaray dib-u-eegista sannadkii koowaad ee hirgelinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP), xoojinta iskaashiga horumarineed, iyo dardargelinta dadaallada lagu xaqiijinayo mudnaanta horumarineed ee Soomaaliya.

Kulanka waxaa sidoo kale ka qayb galay Agaasimaha Guud ee Wasaaradda, Mudane Cabdifataax Cabdulqaadir Faarax, iyo Agaasimaha Waaxda Isku-duwidda Deeqaha, Mudane Cabdifataax Cismaan Xasan.

Kulanka ayaa lagu falanqeeyay horumarka laga gaaray hirgelinta NTP-ga, waxtarka hababka iskaashiga horumarinta, kormeerka iyo qiimaynta barnaamijyada, iyo sidii loo xoojin lahaa isku-xirnaanta iyo saameynta taageerada caalamiga ah si ay ula jaanqaaddo himilooyinka qaranka.

Sidoo kale, Wasiirka waxa uu la wadaagay deeq-bixiyeyaasha horumarka laga sameeyay hirgelinta qaab-dhismeedka iskaashiga horumarinta, horumarinta nidaamyada maamulka deeqaha, iyo diyaarinta hannaanada lagu xoojinayo fulinta, kormeerka iyo qiimaynta Qorshaha Isbeddelka Qaranka.

Wasiirka ayaa uga mahadceliyay saaxiibbada horumarinta taageerada joogtada ah ee ay siiyaan Soomaaliya, isagoo carrabka ku adkeeyay muhiimadda ay leedahay in taageerada horumarineed lagu saleeyo mudnaanta qaranka, lana xoojiyo lahaanshaha dowladda, isla xisaabtanka, iyo awoodda hay'adaha dowladeed si loo xaqiijiyo natiijooyin waara oo la taaban karo.

## Shirka Dib-u-Eegista Horumarka iyo Dardargelinta Fulinta Mashruuca Barwaaqo oo Nairobi ka Furmay




**MUQDISHO, SOOMAALIYA | 2-da Juun 2026:** Shirka Dib-u-Eegista Horumarka iyo Dardargelinta Fulinta Mashruuca Adkeysiga Biyaha iyo Horumarinta Reer Miyiga Soomaaliya (Barwaaqo) ayaa ka furmay magaalada Nairobi ee dalka Kenya. Shirkan oo socon doona muddo saddex maalmood ah ayaa waxaa ka qeybgalaya Unugga Qaran ee Isku-duwidda Mashruuca (NPCU), Unugyada Fulinta Mashruuca ee Dowlad-Goboleedyada xubnaha ka ah Dolwdda Federaalka Soomaaliya, iyo Kooxda Hawlgalka Bangiga Adduunka.

Shirka ayaa waxaa si rasmi ah u furay Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, Mudane Cabdifataax Cabdulqaadir Faarax, oo khudbaddiisii furitaanka ku adkeeyay muhiimadda iskaashiga iyo wada-shaqeynta lagu dardargelinayo hirgelinta mashruuca iyo gaarista natiijooyinka la hiigsanayo.

Shirku wuxuu diiradda saarayaa dib-u-eegista horumarka laga gaaray mashruuca, bixinta hagid iyo taageero farsamo, aqoonsiga caqabadaha hortaagan fulinta, iyo dejinta tallaabooyin lagu dardargelinayo hirgelinta howlaha mudnaanta leh. Inta uu socdo, waxaa sidoo kale lagu falanqeyn doonaa maamulka maaliyadda, qandaraasyada, kormeerka iyo qiimeynta, ilaalinta deegaanka iyo bulshada, iyo natiijooyinka laga gaaray mashruuca.

Mashruuca Barwaaqo wuxuu door muhiim ah ka ciyaaraa xoojinta helitaanka biyaha, kor u qaadista adkeysiga isbeddelka cimilada, dib-u-soo-nooleynta deegaanka, iyo horumarinta nolol-maalmeedka bulshooyinka reer miyiga ee Soomaaliyeed.

## Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta oo Ka Qayb Galay Shir ku Saabsan Barnaamijka Deyn-Cafinta iyo Horumarka Dhaqaalaha Soomaaliya




**MUQDISHO, SOOMAALIYA | 2-da Juun 2026:** Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, Mudane Cabdifataax Cabdulqaadir Faarax, ayaa ka qayb galay shir ku saabsan barnaamijka deyn-cafinta Soomaaliya oo ay soo qabanqaabisay Hay'adda Lacagta Adduunka (IMF), kaas oo lagu qabtay hab fogaan-arag (virtual).

Shirka ayaa diiradda lagu saaray horumarka laga gaaray hirgelinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025--2029), deeqaha horumarineed iyo kuwa bani'aadannimo ee dalka soo gaara, xaaladda sugnaanta cuntada, saameynta abaaraha, iyo warbixinno la xiriira halbeegyada iyo dib-u-eegista barnaamijka deyn-cafinta ee u dhexeeya Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo IMF.

Kulanka waxaa sidoo kale ka qayb galay khubaro ka socotay IMF iyo wakiillo ka kala socday hay'adaha muhiimka ah ee Dowladda Federaalka Soomaaliya. Inta uu shirku socdo maalmaha soo socda, waxaa lagu soo bandhigi doonaa warbixinno iyo falanqeyn ku saabsan xaaladda dhaqaale ee dalka, horumarka dib-u-habaynta maaliyadda guud, maamulka dhaqaalaha, iyo saameynta ay xaaladaha gobolka iyo xiisadaha Bariga Dhexe ku leeyihiin ganacsiga iyo kobaca dhaqaalaha.

Ka qaybgalka kulankan ayaa qayb ka ah dadaallada Dowladda Federaalka Soomaaliya ay ku xoojinayso wada-shaqeynta hay'adaha maaliyadeed ee caalamiga ah, kor u qaadista hufnaanta maareynta dhaqaalaha, iyo dardargelinta hirgelinta mudnaanta horumarineed ee ku xusan Qorshaha Isbeddelka Qaranka.

## Wasaaradda Qorsheynta oo Qabatay kulan lagu Dardargelinayo Dadaallada Lagu Xoojinayo Nidaamka Kormeerka iyo Qiimeynta ee Arrimaha Caafimaadka



**MUQDISHO, SOOMAALIYA | 1-da Juun 2026:** Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, iyadoo kaashanaysa Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha iyo Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada, ayaa qabatay shir muhiim ah oo lagu xoojinayo is-waafajinta nidaamyada kormeerka iyo qiimeynta ee Arrimaha caafimaadka. Shirkan ayaa ujeeddadiisu ahayd kor u qaadista isticmaalka xogta iyo caddeymaha lagu kalsoon yahay si loo taageero go'aan-qaadasho hufan iyo qorsheyn wax-ku-ool ah.

Kulanka ayaa diiradda lagu saaray hirgelinta Siyaasadda Qaranka ee Kormeerka iyo Qiimeynta iyo Habraaca Qaranka ee Qiimeynta, iyadoo si gaar ah loo falanqeeyay hababka lagu horumarin karo qorsheynta, dabagalka iyo qiimeynta barnaamijyada caafimaadka dalka.

Shirka waxaa guddoomiyay Kusimaha Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta Qaranka, ahna Agaasimaha Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta, Mudane Maxamuud Siciid Nuur.

Sidoo kale, waxaa kulanka ka qayb galay Lataliyaha Farsamo ee Arrimaha Caafimaadka ee Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha, Dr. Siciid Xirsi, Madaxa Kormeerka iyo Qiimeynta ee Wasaaradda Caafimaadka, Dr. Cabdijaliil Cabdullaahi Cali, iyo masuuliyiin kale oo ka tirsan Wasaaradda Qorsheynta.

Shirkan ayaa ka tarjumaya dadaallada joogtada ah ee Wasaaradda Qorsheyntu ku hormarinayso nidaamyada qorsheynta, Kormeerka iyo qiimeynta, si loo xoojiyo adeegyada caafimaadka,loo taageero horumar waara, iyo go'aan-qaadasho ku dhisan xog sax ah iyo caddeymo la isku halayn karo.

